

## HADDA HALA BAAHIYO

### MARQAATI OO KA WALAACSAN IN MAGACAABISTA RW CUSUB AY MUUJINEEYSO IN ISEBEDEL UUSAN DHICI DOONIN

**Mogadishu, 24 Feb 2017 --** Marqaati oo ah hay'adda keliya ee aan dawliga aheyn oo ka shaqeysa la dagaalanka musuqmaasuqa Soomaaliya, waxay ka walaacsan tahay u magacaabista Xasan Cali Kheyre in uu noqdo Raisal Wasaaraha cusub ee Soomaaliya. RW magacaaban wuxuu saaxib dhaw la yahay shaqsiyaad wasaqeeysan oo ka tirsan dawladda sii baxeys, gaar ahaan madaxweynihi hore oo ku kacay musuqmaasuq ba'an sanadki la soo dhaafay.

Waxaa kaloo lagu eeddeeyay in uu yahay qof lacagta uu ku qarsan jiray madaxweynihi hore uuna ku meteli jiray heshiisyada ganacsiga sida Soma Oil and Gas. Wuxuu sidoo kale si dhaw uga qeeyb qaataay ololihii doorashada madaxweynihi hore ee aadka u musuqmaasuqa badneyd, sida ay sheegayaan ilo ka tirsan xukuumadda sii baxeysa.

Waxaan ugu yeereeynaa madaxweyne Farmaajo in uu ka noqdo magacaabistan haddii Mr. Kheyre uusan cadeyn karin in wax lug ah uusan ku laheyn musuqmaasuqa xukuumaddii hore iyo go'aan cad oo ah in lala xisaabtamo dadki hantida dadweynaha lunsaday.

"Baarlamaanka Soomaaliyeed waa in si qoto dheer ah ay u baaraan taariikhdiisa iyo tan saaxiibadiis, iyo qorshahiisa la xiriira la dagaalanka musuqmaasuqa. Ma ahan in ay aqbalaan in ay noqdaan tiimbaro uu madaxweynaha u isticmaalo siduu doono. Waa in ay awooddooda u isticmaalaan in lagula xisaabtamo madaxweynaha iyo in ay xaqijiyaan in madaxweynaha uu xilalka u dhiibo dad hawlkar ah oo aamin ah," ayuu yiri Maxamed Mubaarak, agaasimaha marqaati.

"Baarlamaanka waa in uu diidaa in uu ansixiyo shaqsigan haddii uusan cadeyn in uusan ku lug laheyn musuqmaasuqa ay ku kaceen saaxiibadiisa iyo haddii uusan si cad u sheegin in uu la xisaabtami doono shaqsiyaadkaa ku kacay musuqmaasuqa," ayuu sii raaciay Mubarak.

Lama aqbali karo in ay sii socoto xaaladda hadda jirta ee ah islaxisaabtan la'aan, xatooyada dhaqaalaha dadweeynaha, qoondexynta heshiisyada dawladda ee ku saleysan saaxiibtinimo siyaasadeed, musuqmaasuq nidaami ah ee xaga garsoorka, iyo shaqo siinta dad aanan u qalmin. Magacaabistan waxaan u aragnaa in ay la micno tahay waxba isma bedeli doonaan.

*marqaati waxay hoggaamineysaa la dagaalnaka musuqmaasuqa Soomaaliya*

**Saxafadda waxay la xiriir karaan**

Mohamed Mubarak      E: marrqaati@gmail.com